

	Somali
I am in one of the listed groups above, why do I have to wait?	Waxaan anigu ku jiraa mid ka mid ah kooxaha kor ku taxan, maxay khasab iigu tahay in aan sugo?
The COVID-19 vaccines will become available as they are approved for use and as each batch is manufactured.	Tallaallada cudurka COVID-19 waxay diyaar u noqon doonaan hadba marka loo ansixiyo isticmaalka iyo hadba marka qayb kaste warshadda laga soo saaro.
So every dose is needed to protect those at highest risk. You will be called in as soon as there is enough vaccine available.	Markaa qiyaas walba ee tallaalka ayaa loo baahan yahay in lagu badbaadiyo dadka halista ugu badan ugu jira cudurka. Waxaa adiga lagu yeeri doonaa islamarka la helo tallaalka ku filan.
Some people who are housebound or live in a care home and who can't get to a local vaccination centre may have to wait for supply of the right type of vaccine. This is because only some vaccines can be transported between people's homes.	Dadka qaarkood oo guriga ku xanniban ama deggan hoy daryeel oo aan tagi karin xarunta tallaalka ee xaafadda ayay khasab ku noqon kartaa in ay sugaan inta la keenayo nooca habboon ee tallaalka. Waxaa tan sabab u ah in tallaallada qaar keliya loo kala qaadi karo guryaha kaladuwan ee dadka.
Where can I get my COVID-19 vaccination?	Halkee ayaan anigu ka heli karaa tallaalkayga cudurka COVID-19?
Vaccines will be offered in a range of settings. Some vaccination teams will visit people to offer the vaccine, for example in care homes, other people may have to go to the nearest centre. Because some of the vaccine has to be stored in a very low temperature freezer, you may not be able to get the vaccine in your normal GP surgery.	Waxaa tallaallada lagu bixin doonaa goobo kaladuwan. Kooxaha tallaalka qaarkood ayaa dadka booqan doona si ay tallaalka ugu bixiyaan, tusaale ahaan hoyada daryeelka, dadka kale waxaa khasab ku noqon karta in ay tagaan xarunta ugu dhow. Maadaama loo baahan yahay in tallaalka qaarkiis lagu kaydiyo barafeeye heerkulkiisu aad u hooseeyo oo aad u qabow, waxaa dhici karta in aanay adiga kuu suurto gelin in aad tallaalka ka hesho xafiiska Takhtarkaaga Guud (GP) ee caadiga ah.
What if the centre I am offered is not easy to get to?	Maxaa dhacaya haddii xarunta aniga la iigu baaqo ay igu adag tahay in aan tago?
Please try to attend the vaccination centre you are offered. If you cannot	Fadlan isku day in aad tagto xarunta tallaalka ee laguugu baaqo ama lagu

attend that centre you may have to wait to get the vaccine in a more convenient location.	soo bandhigo. Haddii aadan xaruntaas tagi karin waxaa khasab kugu noqon karta in aad sugto si aad tallaalka uga hesho goob ama meel kaaga fudud.
Can I pay for a COVID-19 vaccine privately or at a pharmacy?	Miyaan lacag ka bixin karaa tallaalka cudurka COVID-19 si aan gooni ugu helo ama uga helo farmashiida?
No, the COVID-19 vaccination is only available through the health service to eligible groups and it is a free vaccination.	Maya, tallaalka cudurka COVID-19 waxaa laga heli karaa oo keliya adeegga caafimaadka waxaana helaya kooxaha dadka u qalma waana tallaalka bilaash ah.
Please read the product information leaflet for more details on your vaccine, including possible side effects, by searching Coronavirus Yellow Card. You can also report suspected side effects on the same website or by downloading the Yellow Card app. coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk	Fadlan akhriso buugyaraha macluumaadka badeecada si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho tallaalkaaga, oo ay ka mid yihiin dhibaatooyinka suurogalka ah in ay soo raacaan, adigoo raadinaya Coronavirus Yellow Card (Kaarka Jaallaha ama huruudda ah ee Koronafayrus). Dhibaatooyinka soo raaca ee lagu tuhunsan yahay waxaad weliba kaga warbixin kartaa isla bartaas internetka ama marka aad soo dejisato abb-ka ama barnaamijka telefoonka gacanta ee lagu magacaabo Yellow Card (Kaarka Jaallaha ama huruudda ah). coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk
Vaccination, helping to protect those most vulnerable.	Tallaalka, caawinaya in la badbaadiyo dadka ugu nuglan.
If you need more information on the COVID-19 vaccination please visit: www.nidirect.gov.uk/covid-vaccine	Haddii aad macluumaad dheeraad ah uga baahan tahay tallaalka cudurka COVID-19 fadlan booqo: www.nidirect.gov.uk/covid-vaccine
COVID-19 vaccination	Tallaalka cudurka COVID-19
Why do I have to wait?	Maxay aniga khasab iigu tahay in aan sugo?
Information about COVID-19 vaccination supplies	Macluumaadka ku saabsan saadka ama qaybaha tallaalka cudurka COVID-19
COVID-19 immunisation Protect yourself	Tallaalka cudurka COVID-19 Naftaada badbaadi
People most at risk from the	Waxaa tallaalka horta loo soo

complications of COVID-19 are being offered the vaccine first.	bandhigayaa ama loogu baaqayaa dadka halista ugu badan ugu jira dhibaatooyinka ka yimaadda cudurka COVID-19.
In Northern Ireland, the COVID-19 vaccines in use require two doses to provide longer lasting protection. They have been shown to be effective in clinical trials and have a good safety record.	Waqooyiga Ayrland gudihiisa tallaallada cudurka COVID-19 ee la isticmaalo waxaa looga baahan yahay labo qiyaasood si looga helo badbaadin ka waqti dheer. Tijaabooyinka lagu sameeyey bukaannada ayaa lagu caddeeyey in ay waxtar leeyihiin oo ay taariikh fiican u leeyihiin badbaadada.
An independent group of experts has recommended that these vaccines are offered first to those at highest risk of catching the disease and of suffering serious complications or dying from COVID-19. This includes older adults in care homes and frontline health and social care workers.	Koox khuburro oo madaxbannaan ayaa ku taliyey in tallaalladan horta loogu baaqo dadka halista ugu badan ugu jira in ay cudurka qaadaan oo ay dhibaatooyin daran kala kulmaan ama ku dhintaan cudurka COVID-19. Waxaa tan ka mid ah dadka waayeelka ah ee deggan hoyada ama guryaha daryeelka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo bulsheed ee safka hore ku jira.
When more vaccine becomes available, the vaccines will be offered to other people at risk as soon as possible.	Marka tallaal dheeraad ah uu soo baxo, waxaa tallaallada islamarka suurogalka ah loogu baaqi doonaa dadka kale ee halis ku jira.
You should have the vaccine when it is offered if you are:	Waa in aad adigu qaadato tallaalka marka laguugu baaqi haddii aad:
living in a care home for older adults	ku nooshahay hoy daryeel oo loogu talagalay dadka waayeelka ah
working in a care home for older adults	ka shaqayso hoy daryeel oo loogu talagalay dadka waayeelka ah
a frontline health and social care worker	ka mid tahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo bulsheed ee safka hore ku jira
Then the vaccine will also be offered in age order to:	Ka dib waxaa tallaalka weliba loogu baaqi doonaa ama loo soo bandhigi doonaa sida ay da'da iskugu xigaan:
• those aged 80 years and over	• dadka 80 jir ah ama ka weyn
• those aged 75 years and over	• dadka 75 jir ah ama ka weyn
• those aged 70 years and over	• dadka 70 jir ah ama ka weyn
• adults who are clinically extremely vulnerable (shielding)	• dadka qaangaarka ah ee bukaan ahaan aad iyo aad u nugul (gabbaad ku jira)
• those aged 65 years and over	• dadka 65 jir ah ama ka weyn
• adults aged under 65 years with	• dadka qaangaarka ah ee 65 jir ka

long-term clinical conditions (see list).	yar ee qaba xaalado caafimaad oo waqti dheer oo calaamado cudur leh (eeg liiska).
Those aged 50-64 will be offered it later.	Dadka da'doodu u dhexeyso 50-64 jir goor dambe ayaa loogu baaqi doonaa.
Please wait your turn. If you are not in the groups above, you will have to wait for a COVID-19 vaccination until more supplies are available.	Fadlan doorkaaga sug. Haddii aadan ku jirin kooxaha sare, waxaa khasab kugu noqon doonta in aad sugto tallaalka cudurka COVID-19 ilaa la helayo qaybo dheeraad ah.
When more vaccine becomes available we will be offering it to more groups of the population.	Marka tallaalka dheeraad ah uu soo baxo waxaan annagu kaas ugu baaqi doonnaa ama u soo bandhigi doonnaa kooxo dheeraad ah oo ku jira shacabka.
Long-term clinical conditions list:	Liiska xaaladaha caafimaadka ee waqti dheer ee calaamado cudur leh:
<ul style="list-style-type: none"> <li>a blood cancer (such as leukaemia, lymphoma or myeloma)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>kansarka dhiigga (sida dhiig caddaadka (leukaemia), lymphoma ama myeloma)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>diabetes</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cudurka macaanka ama sonkorowga</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>dementia</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cudurka asaasaqa (dementia)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a heart problem</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>dhibaato ku jirta wadnaha</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a chest complaint or breathing difficulties, including bronchitis, emphysema or severe asthma</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cabashada xabadka ama laabta ama dhibaatooyin neefsasho, oo ay ka mid yihiin boronkiitada, cudurka sanbabbada ee emphysema ama cudurka neefta ama naqaska ee daran</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a kidney disease</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cudurka kelyaha</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a liver disease</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cudurka beerka</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>lowered immunity due to disease or treatment (such as HIV infection, steroid medication, chemotherapy or radiotherapy)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>difaaca dabiiciga ah ee jirka ee daciifsan sababtoo ah cudur ama daawayn (sida caabuqa fayruska HIV, daawada istiiroodis leh, dabiibka kiimikeed ama dabiibka shucaaca)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>rheumatoid arthritis, lupus or psoriasis</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>xanuunka tufta ee kalagoysyada jirka (rheumatoid arthritis), cudurka waxqabadka xad dhaafka ah ee difaaca dabiiciga ah (lupus) ama cudurka sooriyaasis ee qolofa haragga</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>have had an organ transplant</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>lagugu tallaalay xubin jir</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>had a stroke or a transient ischaemic attack (TIA)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>kugu dhacay cudurka faaliga ama dhiigga waqti gaaban ka go'a maskaxda (transient ischaemic attack) (TIA)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a neurological or muscle wasting</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>xaaladda caafimaadka ee</li> </ul>

condition	neerfaha ama burburka muruqa
<ul style="list-style-type: none"> <li>a severe or profound learning disability</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>naafonimo waxbarasho oo daran ama qotodheer</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>a problem with your spleen, eg sickle cell disease, or you have had your spleen removed</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>dhibaato ku jirta beeryarahaaga, matalan cudurka qaabka xun ee unugyada dhiigga cas (sickle cell disease), ama lagaa saaray beeryarahaaga</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>being seriously overweight (BMI of 40 and above)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>culayska xad dhaaf badan (cabbirka culayska iyo dhererka jirka (BMI) ee 40 ah ama ka sarreeya)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>severe mental illness.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>cudurka maskaxda ee daran.</li> </ul>
At the same time the vaccine will also be offered to:	Isla waqtigaas waxaa tallaalka weliba loogu baaqi doonaa:
<ul style="list-style-type: none"> <li>adults who provide regular care for an elderly or disabled person</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>dadka qaangaarka ah ee daryeel joogto ah ugu deeqa qof waayeel ah ama naafaysan</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>younger adults in long-stay nursing and residential settings</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>dhallinyarada qaangaarka ah ee ku jira goobaha xannaanaynta iyo degganaanshaha ee waqti dheer la joogo</li> </ul>